



Ebola

Maxuu yahay Ebola?

Ebola waa mid ka mid ah cudurada loo yaqaan firuska qandhada hemorrhagic. Cuduradaan waxaa sababa firusyada u horseeda qandho badan iyo, mararka qaar, dhiig bax darran (hemorrhage). Cudurka laga qaado firuska Ebolka si gaar ah ayuu halis u yahay, qadarka dhimashadana waa bogolkiiba 50-90.

Ebola waa cudur ku dhaca xoolaha, dadkana qaadaan marka ay ku dhawadaan dhiigga, dhacaanka ama jirka xoolaha qaba cudurka. Kaddib, cudurka wuxuu ka gudbi karaa qof ilaa qof kale. Ebola wuxuu aasaasiyan ka dilaacaa Bartamaha iyo Galbeedka Afrika.

Maxay yahiiin calaamadaha Ebola?

Calaamadaha waxaa ka mid ah qandho, madax xanuun, xanuunka jirka, shuban, mattag, calool xanuun iyo marmar dhiig bax aan caadi ahayn. Calaamadaha waxay bilowdaan labo ilaa 21 maalin kaddib marka qofka la xariiro firuska Ebola.

Sidee ayuu u faafaa Ebola?

- Ku dhawaad mar kasta, Ebola wuxuu ku faafaa xariirka toos ee lala sameeyo dhiigga, dhacaanka jirka ama saxarada qof xanuunsan oo qaba Ebola; waxaana laga qaadaa waxyaabaha sida cirbidaha soo gaaray dhacaanka jirka; ama xariirka toosan ee lala sameeyo bukaanka Ebola.
- Qofka cudurka qaba ma faafin karo Ebola ka hor inta uusan qaadin calaamadaha cudurka.
- Waxaa suurtoagal ah in dadka ka raysta Ebola u gudbiyaan dadka kale haddii firuska ku jiro dhiigooda ama dhacaanka kale ee jirkooda. Dhiigga iyo dhacaanka waxay qaadi karaan cudurka ilaa dhowr todobaad.
- Ebola kuma faafo istaabashada caadiga.
- Ebola kuma faafo biyaha, ama raashinka ka baxa Mareykanka.
- Ma jirto caddeyn xooggan in Ebola ku faafo hawada.
- Gacan gashadka, daboolka wijiga, badbaadinta isha iyo labbiska badbaadinta waxay ka hortaggi karaan in Ebola ku faafo bukaanka ilaa bixiyaha daryeelka.

Yaa halis uga jira Ebola?

- Badanaa dadka, aad ayay u yar tahay in ay qaadaan halista Ebola.
- Dadka daryeela bukaanka Ebola waxay ku jiraan halis sare maxaa yeelay waxay xariir la leeyahiin dhiigga ama dhacaanka jirka.
- Dadka la xariira jirka dadka qaba Ebola waxay ku jiraan halista iyo waa in ay qaataan talaabo ay isku badbaadiyaan si ay uga hortagaan cudurka.

Sidee ayaa loo daweyaa Ebola?

- Bukaanka Ebola waxaa la siiyaa dareere iyo waxaa laga baddalaa dhiigga ka lumay.
- Ma jirto daawo loo haysto shattii oo daweyso Ebola iyo talaal looga hortago. Waxaa iminka la qiimeeyaa dhowr daawo oo tijaabo ah.
- Waa la soocaa bukaanka Ebola si looga hortago faafidda cudurka. Kuwa la xariira bukaanka ama jirka qof u dhintay Ebola waa in ay qaataan labbis ay isku badbaadiyaan, waa in ay in badan dhaqaan gacmahooda iyo in ay qaadaan talaabo looga hortago cudurka.

Ammaan miyaa in safar lagu tago meelaha uu ka jiro?

Halista waa yar tahay hase ahaatee waxaa lagu talliyaa in aadan safar ku tagin waddan uu ka dillaacay Ebola.

Haddii ay waajib kugu tahay in aad safartid

Haddii ay waajib kugu tahay in aad safar ku tagid waddan uu ka jiro Ebola:

- Qaad talaabo aad ku badbaadisid naftaada si aad isaga ilaalisid cudurada la xariira safarka.
- La hadal takhtarkaada ama kliinikada caafimaadka safarka haddii aad ku talo jirtid in aad safar ku tagtid meel uu ka dillaacay.
- Fiiri bogga internetka Caafimaadka Musafarka CDC si aad u heshid ogeysiisyada ku saabsan cudurada qaar iyo waddamada: fiiri wwwnc.cdc.gov/travel/notices.

(dhinaca kale)



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-085
Somali

(Ebola sii socda)

Kaddib marka aad safatid

Haddii adiga ama qof kale oo ka tirsan kooxdaada safarka isku aragtaan qandho, madax xanuun, ama xanuunka meelaha ximnaha iska galaan ama murqaha muddo saddax todobaad gudahooda kaddib marka aad ka soo noqotid safarka:

- Wac bixiyahaada daryeelka caafimaadka isla markiiba. U sheeg calaamadahaada iyo in aad u socotid meel cudurka ka jiro. Waxay kuu sheegi doonaan haddii aad u baahan tahay in aad timaadid.
- U sheeg takhtarkaada hawlaha aad ku lug lahayd iyo haddii aan la xariirtay qof qaaday Ebola.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-085